2021

# DOODAHA BAYAAN


BRC
Bayan Research Center of America
مركز بيان للبحوث في أمريكا

**"Qorshaynta Daryeelka Caafimaadka Nolosha"**


***Dr. Maxammad Aadan***

**Bayan Research Center**

**7/10/2021**


Bayan Resear...
Go'aannada Daryeelka Caafimaadka
(Healthcare Decisions)
Go'aan qaadashada daryeelka caafimaad ee bukaanku wuxuu ku xiran yahay:
- Garaadkiisa (cognition)
- Aqoontiisa (health literacy)
- Rabitaankiisa tayo nololeedka (wishes) Qiraal ama Qoraal
- Fahamkiisa qaababka la tacaallidda (understanding options)
- Talooyinka dhakhaatiirta
- Doorashadiisa (choice)
BRC





**ARAR**

**Xarunta Cilmibaarista Bayaan** oo ah xarun bulsheed, oo aan faa'iido doon ahayn, isla markaana abuuraysa deegaan aqooneed togan, kuna qotoma dadka iyo aragtiyaha, iyada oo loo marayo abuurista baraarug, diyaarinta hoggaamiyayaal, iyo dhisidda bulshada, waxa ay soo qabanqaabisay kulankaan oo qayb ka ah muxaadarooyinka bayaan ay wacyiga bulsheed kor ugu qaadayso. Muxaadiradaan ayaa cinwaankeedu yahay "**Qorshaynta Daryeelka Caafimaadka Nolosha/ End of Life Care Planning".** Muxaadiradaan ayaa ka turjumaysa arrimaha soo noqnoqda oo ay tahay in laga sameeyo dood iyo cilmibaaris. Muxaadirada ayaa diiradda saaraysa 2 dhinac oo kala ah dhanka Diinta iyo dhinaca Caafimaadka, Xarunta Bayaan waxa ay u mahadcelinaysaa ***Dr. Maxammed Aadan*** oo runtii muxaadiradaan caawa marti noogu ah.

Doodda waxaa daadihinayay isla markaana qaybinayay hadalka; **Sh. Maxammed Shucayb** oo kamid ah aasaasayaasha – **BRC**- ahna Guddoonka guud ee Xarunta.

**ARAR**

***Dr. Maxammed Aadan*** ayaa ku bilaabay muxaadirada in uu sharraxo erey-bixinno ay muhiim tahay in la fahmo si loo weeleeyo biyo-dhaca muxaadarada. Erey-bixinnadaas waxaa kamid ahaa:

- **Palliative**: Daweynta cabashooyinka cudurka ee qofku sheeganayo.
- **Care**: Daryeel
- **Palliative Care:** Waa hab daryeel caafimaad oo u jeeddadiisu tahay in silicii xanuunku keenay laga yareeyo, iyo in qofka laga caawiyo sidii uu uga nefisi lahaa cabashooyinka cudurka haya [sida; xummadda, neef-tuurka, lalabada, iyo mantagga]
- **Curative Care:** Ujeeddadiisu waa in uu bogsado bukaanku si uu usii noolaado

Dr-ka ayaa sheegay in **Palliative Care** uu jiray beri-samaadkii, waxaana loo adeegsan jiray malabka la qaato, ama in qofka la mantajiyo oo loo raaxeeyo. Nebiga NNKH oo arrintaas caddaynayana wuxuu yiri: **إن الحمى من فيح جهنم، فابرُدوها بالماء**

Kolka qofka xanuun ku dhaco dhakhtarku waxa uu u kala qaybiyay saddex xaaladood mid kood in uu noqonayo xanuunkaasi:

1. **Acute Condition**: waa xaalado xanuunka/ cudurka la ciribtirikaro ama la dawayn karo.
2. **Chronic disease:** waa xaalado xanuunka/ cudurka aan la ciribtirikarin balse la xakamayn karo, se qofku uu la noolaanayo xanuunka.
3. **Life threatening condition:** waa xaalado xanuunka/ cudurka aan la ciribtirikarin ama waxba laga qaban karin oo nafta halis gelinaya.

Dhanka kale, ***Dr. Maxammed Aadan*** ayaa sheegay maadaama naftu markasta dhimanayso in ay mudan tahay in loo diyaar garoowe geerida, isaga oo kusoo ururiyay diyaargarowgaas:

- Towbada iyo acmaasha wanaagsan
- Xuquuqda aadanaha [ gefka, daynta iwm]
- Hantida [dardaaranka iwm]
- Dardaaranka aaska/ godka lagu aasayo
- Dardaaranka daryeelka caafimaadka.

## GO'AANNADA DARYEELKA CAAFIMAADKA:

Go'aan qaadashada daryeelka caafimaadka ee bukaanku wuxuu ku xiran yahay:

- Garaadkiisa – in uu miyir qabo
- Aqoontiisa – waa in uu garanayo daawada uu qaadanayo iyo xanuunka haya
- Rabitaankiisa tayo nololeed – qiraal ama qoraal
- Fahankiisa qaababka la tacaamulidda
- Talooyinka dhakhaatiirta
- Doorashadiisa

## DARDAARANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA:

Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka [Advanced Care Planning – ACP] waa qaab qoraal oo qofku ku qeexayo – inta uu fiyowyahay – sida uu doonayo in loola tacaalo haddii uu miyir beelo ama afku juuqda gabo.

**Tusaale ahaan:** qod da' ah ayaa waxaa kusoo booday xanuun, qofkaasi ma hadli karo, ma xaajo gudan karo, ma dhaqaaqi karo, afkana wax kama qaadan karo!

## FAA'IIDOOYINKA DARDAARANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA:

**[Tasho ama waa laguu tali]**

1. In qaab aadan rabi lahayn jirkaaga loola tacaalin.
2. In aadan xaalad aadan jeclaan lahayn aadaan ku noolaan.
3. In qoyskaagu isu calool fayoobaado oo uusan isu caroon.
4. In qoyskaagu aysan ka niyad xumaan go'aanka ay qaataan, maadaama aysan garanayn sida aad jeclaan lahayd.

**QORSHAYNTA DARYEELKA CAAFIMAADKA NOLOSHA:**

وَجَاءَتْ سَكْرَةُ الْمَوْتِ بِالْحَقِّ ذَلِكَ مَا كُنْتَ مِنْهُ تَحِيدُ*

Waa daryeel ku aaddan in qofka laga garabsiiyo silica iyo sakaraadka iyo siduu nefis u dareemi lahaa maalmaha u dambeeya noloshiisa.

**KAALINTA CULUMADA DIINTA EE DARYEELKA CAAFIMAADKA:**

- Sabasrsiinta iyo taakulaynta bukaanka – xagga niyadda iyo xag kaleba.
- Ka caawinta silica nafsadeed – Spiritual Pain.
- Siinta talooyin Diineed – gaar ahaan go'aannada caafimaad.
- U la qinidda Shahaadada gunaanadka noloshiisa.
- Garab istaagga qoyska bukaanka.
- U diyaar garowga geerida.
- Ka warqabidda qoyska marxuumku ka baxay - Grief Counselling.

**GUNAANAD**

---

Muxaadaradu waxa ay kusoo idlaatay talo bixin iyo dardaaran. Guud ahaanna waxaa diiradda lagu saaray sidii bukaanka macnawi ahaan loo daweyn lahaa iyo sidii maaddi ahaanba loo garab istaagi laha. Kulanka waxaa kasoo qayb galay dhakhaatiir iyo culimo waaweyn oo uu ka mid ahaa ***Sh. Yuusuf cabdulle*** *– kamid ah Culimada Masaajidka Abuubakar, ahna guddoomiyaha Hay'adda Ayaan* – iyaga oo bogaadiyay sida ***Dr. Maxammed Aadan*** uu isugu dheelli tiray muxaadarada, isaga oo isku dhafaya dhan diineed iyo dhan caafimaad ba. Dhanka kale, ***Sh. Yuusuf cabdulle*** ayaa si gaar ah u tilmaamay in culuumta aadanaha oo dhan loo baahan yahay in la Islaamiyo, taas oo ay horay culimada Islaamku ugu dhiirratay, sidoo kale waxa uu Shiikhu u mahadceliyay Xarunta Bayaan oo shaqadaan abaabulkeeda lahayd...

Ugu danbaynna, **Sh. Maxammed Shucayb** oo kulanka daadihinayay ayaa uga mahadceliyay dhammaan dhegeystayaashii iyo kasoo qayb galayaashii doodda oo ay ugu horreeyeen culimada iyo dhakhaatiirtu...

Haddaba doodda oo faahfaahsan oo dhammaystiran lifaaqa hoose ka dhegayso:

https://www.youtube.com/watch?v=VwRS64lESQ0&t=1466s